Sii deynta **Wararka**

# Ardayda dib ugu soo laabanaysa waxbarashada sida tooska ah iskuulka loo tegeyo Jan. 10

Janaayo 5, 2022

Si loo taageero guud ahaan fayoobaantooda, Adeegyada Hore ee Dhalaanka ilaa ardayda fasalka 12aad waxay ku soo laaban doonaan fasallada Jan. 10 iyada oo ay  jiri doonaan tallaabooyin si ay u sii wataan waxbarashada si badbaado leh. Qalab cusub oo wax looga qabanayo carqaladaynta ku timid waxbarashada ee fasallada 4-9 ee ardayda ayaa sidoo kale la hirgelinayaa.

Ardaydu waxay ku soo laaban doonaan waxbarashada sida tooska ah iskuulka loo tegeyo iyagoo heleya badbaadada dheeri ah ee helitaanka baarista degdega ah iyo waji-xirka nooca caafimaadka oo loo qaybin doono dugsiyada si ay u noqdaan heer kale ee ilaalinta dheeraadka ah ee ka dhanka ah noocyada Omicron ee COVID-19.

Shixnadaha baaritaanada degdega ah iyo waji-xirka ayaa bilaaban doona asbuucan dhammaan dugsiyaduna waxay heli doonaan shixnadoodii ugu horreysay dhammaadka toddobaadka soo socda. U Qaybinta ardayda iyo shaqaalaha waxay dhici doontaa marka dugsiyadu helaan agabkooda. Baaritaanada degdegga ah iyo af/san xirka labadaba waxaa loo keeni doonaa qayb qayb.

Tallaabooyinka muhiimka ah ee caafimaadka ee horeyba loo sameeyay ayaa sii wadi doona badbaadada ardayda ee fasallada. Kuwaas waxaa ka mid ah shuruudaha waji-xirka, kala-fogaanshaha jirka, isku-duubnida koox ahaaneed, fayadhowrka la xoojiyey iyo dhaqamada nadaafadda, helitaanka tallaalka qof kasta oo da'diisu tahay shan sano iyo wixii ka weyn, iyo dhiirigelinta maamulka dugsiga inay haystaan caddaynta siyaasadaha tallaalka ee dadka waaweyn.

## Qalab cusub oo wax looga qabanayo carqaladaynta waxbarashada

Marka lagu daro in la haysto taageerooyin si badbaado leh ee waxbarashada sida tooska ah iskuulka loo tegeyo, toddobaadka soo socda ardayda fasallada 4 ilaa 9 iyo waalidkood waxay awoodi doonaan inay daawadaan agab wax dhigista ee internetka ah oo lacag

la'aan ah, iyada oo loo marayo Qolka Barashada ee Internetka, si ay ula qabsadaan xirfadaha muhiimka ah iyo inay ardaydu bartaan wixii  dib u dhacay ee ugu yimid cudurka faafa awgeed. Khayraadkan cusub waxa uu ku dhisan yahay maalgelinta dawladda oo gaareysa ilaa $45 milyan si wax looga qabto carqaladaynta waxbarashada ee la xiriirta COVID-19 ee ardayda fasalada 1 ilaa 3.

Qolka Barashada ee Internetka waxa lagu bilaabayaa casharo muuqaal ah oo horay loo duubay, ardayda iyo waalidkooduna waxa ay heli karaan wakhti kasta si ay u dhistaan xirfadahooda wax qoris iyo xisaabeed. Dabayaaqada sanadkan, Hay'adda Waxbarasada ee Alberta waxa ay balaarin doontaa adeegyada waxbaridda ee khadka internetka ah si ay u buuxiso fasallo iyo maaddooyin badan, oo ay ku jiraan waxbarid toos ah. Jawaab celinta maamulka dugsiga, waalidiinta iyo ardayduna waxay ku wargelin doonaan mawduucyada iyo baahiyaha kulanada cusub ee barashada.

## U wareegitaanka waxbarashada guriga

Dawladdu waxay sii wadi doontaa inay kala shaqeyso maamulka dugsiga isbeddelada waxbarashada guriga, haddii loo baahdo. Maamulka dugsigu wuxuu sii wadi doonaa inuu yeesho dabacsanaan uu fasalka ama fasalka gaarka ah ugu beddelo waxbarashada muddada-gaaban ee guriga haddii loo baahdo si wax looga qabto caqabadaha hawlgelinta ee dugsiga. Go'aannada ku saabsan u wareejinta dhammaan dugsiyada ama maamulka dugsiga waxbarashada guriga ayaa sii wadi doonta in ay samayso dawladda Alberta, iyada oo talada laga helayo maamulka dugsiga. Labada xaaladoodba, tixgelin ayaa la siin doonaa heerka maqnaanshaha ardayga, awoodda maamulka dugsiga ama dugsiga si ay u helaan shaqaale diyaar u ah inay ka shaqeeyaan fasallada dugsiga iyo macluumaadka kale ee khuseeya, oo ay ku jiraan xogta caafimaadka deegaanka, haddii la heli karo.

## Xaqiiqooyinka degdega ah

- Qalabka baaritaanka degdega ah ee guriga iyo waji-xirka nooca caafimaadka labadaba waxa loo qaybin doonaa iyadoo la isticmaalayo hab habaysan, iyada oo shixnado loo diri doono dugsiyada hadba sida uu gobolku u helo.
- Marka hore, sanduuqyada shan xirmooyinka baaritaanada degdegga ah ee guriga ayaa bixin doona sahay ku filan arday kasta iyo xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha si ay isu baaraan laba jeer toddobaadkii ee 2.5 toddobaad iyo sahayda af=xirka ee laba toddobaad ah arday kasta iyo shaqaalaha ayaa sidoo

kale loo gaarsiin doonaa. Af-xirka heer caafimaad ah ayaa la tijaabiyay oo buuxiyey heerarka caalamiga ah.

- U beddelo waxbarashada guriga:
  - Maamulka raba in ay u wareejiyaan dhamaan maamulka dugsiga ama dugsiga waxbarashada wakhtiga gaaban ee guriga waxa ay u baahan doonaan in ay ogolaansho ka codsadaan Wasiirka
  - Shuruudaha lagu ansixinayo isbeddelku waxay ku salaysnaan doonaan baahida hawleed ee ay sabab ugu tahay maqnaanshaha ardayda iyo shaqaalaha, tallaabooyinka hore loo qaaday iyo xogta caafimaadka deegaanka, haddii la heli karo
- Kulamada gargaarka waxbarashada khadka internetka ee Qolka Gargaarka barashadaa (e-Tutoring Hub) waxay noqon doonaan:
  - lacag la'aan ah, oo helitaan aan xadidnayn u leh dhammaan ardayda, waalidiinta, iyo shaqaalaha dugsiga
  - ilaa 15 daqiiqo muddo ah oo loogu talagalay ardayda da'da yar iyo ilaa 60 daqiiqo ardayda waaweyn
  - si toos ah loo bixiyo inta lagu jiro maalinta dugsiga, gelinka dambe iyo fiidkii si loo daboolo baahiyaha ardayda iyo qoysaskooda
  - loo qaabeeyey loona dhiibey si loo ilaaliyo khaasnimada shaqsiga
  - la heli karo 24-7 sida muuqaal la duubay
  - ay soo saareen macalimiinta haysta shahaadada ay siisay Alberta oo ka shaqeeya Waxbarashada Alberta
- Inta lagu jiro aafada, maamulka dugsigu waxay fursad u heleen in ka badan $1 bilyan oo ah maalgelinta cashuur bixiyayaasha ee loogu talagalay COVID-19. Tan waxaa ka mid ah $120-milyan oo kororka maalgelineed ee hawlgelinta dhammaan maamulada dugsiyada ee gobolka oo dhan sannad dugsiyeedka 2020-21, $250 milyan oo dayactirka hantida ah oo la dedejiyey iyo maalgelinta cusboonaysiinta inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka 2020-21, helitaanka kaydka guddiga cashuur bixiyaha ay maalgeliso, iyo sidoo kale $130 milyan oo ah maalgelinta yaraynta COVID-19 ee sanad dugsiyeedka 2021-22.
  - Kaydadka maamulka dugsigu waxa ay kordheen $80 milyan ilaa $464 milyan laga bilaabo Agoosto 31, 2021, sannad dugsiyeedka 2020-21. Guud ahaan raasamaalka iyo kaydka hawlgelinta ayaa ku fadhiya in ka badan $700 milyan.

## Xogta la xiriirta

- Badbaadada iyo caafimaad ku sugnaanta ee sanadkan)

## Wararka la xiriira

- Fasaxa jiilaalka oo loo kordhiyay ardayda K-12 (Dec 30,2021)
- Ka caawinta ardayda inay la qabsadaan (Oct 27, 2021)

## Warbaahinta

- Fiidiyow: Baaritaanka degdeg ah oo guriga dhexdiisa ah
- Daawo shirka jaraa'id

## Weydiimaha warbaahinta

Dylan Topal

- 780-886-2912
- Ku-simaha Xoghayaha Warfaafinta, Waxbarashada